

Barnaamijka Taakulaynta Ilmaha  
ee Gobolka Washington



# Dulmarka Guud



*Washington State*  
Department of Social  
& Health Services

---

*Transforming lives*

---





## Taakulaynta ilmaha waa mid muhiim ah

Carruurta waxay taakulayn uga baahanyihiin dhammaan waalidiinta. Marka waalidku aanan la noolayn ilmaha, taakulaynta ilmuhu waa lacagta la bixiyo si loogu bixiyo baahooyinka aasaasiga ah ee ilmaha.

- Baahooyinka aasaasiga ah ee ilmaha waxaa kamid ah cunto, guri iyo dhar
- Sidoo kale waxaa kamid noqon kara qiimooyinka daryeelka maalinta iyo ceymiska caafimaadka
- Taakulaynta ilmuhu waa mid ka baxsan bixinta waalidka uu bixiyo wakhtigiisa, jacaylkiisa iyo taakulaynta dareenka
- In la daryeelo baahooyinka carruurta waxay siinaysaa nolol ammaan ah, oona caafimaad leh
- Anagu ma dammaana qaadayno aruurinta taakulaynta ilmaha ama lacag bixinada

## Waaxda Taakulaynta Ilmaha

Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada, Waaxda Taakulaynta Ilmaha (DCS) ayaa aruurinaya taakulaynta ilmaha ee loogu talagalay carruurta leh waalid ama waalidiin aan guriga joogin ay ku jiraan kuwa qaadanaya caawimaada dadweynaha.

Waalidiinta iyo daryeel bixiyayaashaba waxay ka codsan karaan Waaxda Taakulaynta Ilmaha caawimaad ku saabsan aruurinta taakulaynta ilmaha iyo fullinta ceymiska caafimaadka.

Haddii aadan hore u haysanin amar loogu talagalay taakulaynta ilmaha, Waaxda Taakulaynta Ilmaha waxay dejin kartaa maamulka amar taakulayn ilmo. Waaxda Taakulaynta Ilmaha sidoo kale waxay u wareejin kartaa kiiska samaynta aabanimada.

Wixii ku saabsan macluumaad dheeraad ah oo khuseeya Waaxda Taakulaynta Ilmaha:

- Naga soo wac lambarkan 800-457-6202
- Ama ka gal Boggeena Internetka ah halkan [www.childsupportonline.wa.gov](http://www.childsupportonline.wa.gov)

## Waaxda Taakulaynta Ilmaha waxay kugu caawin kartaa...

- In aad heshid amarka taakulaynta ilmaha ee loogu talagalay carruurtaada
- In ay samayso aabanimada
- In ay aruuriso taakulaynta ilmaha hadda ah iyo mida la isku leeyahay
- In ay fulliso taakulaynta caafimaadka
- In ay bedesho amarka taakulaynta ilmahaaga
- In ay la shaqayso gobolo kale si loogu aruuriyo taakulaynta adiga magacaaga

## Waaxda Taakulaynta Ilmaha kuguma caawin karto...

- Xanaanada ilmaha ama khilaafyada booqashada
- Fullinta dejinta guriga bulshada
- Aruurinta lacagaha qareenka
- Deymaha kale ee aan-xiriirka la lahayn taakulaynta ilmaha

## Codsashada adeegaha Waaxda Taakulaynta Ilmaha

Waalidiinta iyo daryeel bixiyayaasha waxay kasoo degsan karaan foomamka halkan:

[www.childsupportonline.wa.gov](http://www.childsupportonline.wa.gov)

(ku dhufo dusha Foomamka Waaxda Taakulaynta Ilmaha)

- ama wac -

800-442-KIDS (800-442-5437)

si aad u codsatid codsiga.

U dir codsiga oo buuxa dhinaca:

DCS

PO Box 11520

Tacoma, WA 98411

Waalidiinta iyo daryeel bixiyayaasha qaadnaya caawimaada dadweynaha uma baahna codsi sababtoo ah Qaybta Adeegaha Bulshada waxay siinaysaa macluumaadka lagama maarmaanka ah Waaxda Taakulaynta Ilmaha.

## Caawimaada dadweynaha

Way ku adagtahay waalidka ama daryeel bixiyaha in uu dusha saarto masuuliyada buuxda ee baahooyinka ilmaha. Mararka qaar waalidiinta iyo daryeel bixiyayaasha waa in ay caawimaad ka helaan canshuur bixiyayaasha tooska lacagta caddaanka ah ee caawimaada dadweynaha si loogu bixiyo guriga ilmaha, cuntada iyo baahooyinka caafimaad. Caawimaadaan waxaa loo yaqaanaa Caawimaada Ku meel gaarka ah ee la siiyo Qoysaska Saboolka ah (TANF).

- Halka waalidka ama daryeel bixiyaha uu ku qaato caawimaada dadweynaha ee loogu talagalay ilmaha gurigooda ama daryeelka koriinka, gobolka wuxuu haynayaa wax kasta oo taakulayn ilmo ah oo lasoo aruuriyay.
- Marka qoyska aanan u baahnayn caawimaada dadweynaha, Waaxda Taakulaynta Ilmaha waxay aruurinaysaa taakulaynta ilmaha kadibna waxay u diraysaa dhinaca waalidka ama daryeel bixiyaha.

- Gobolka waxaa dhici karta in uu haysto qaar kamid ah lacag bixinada taakulaynta ilmaha marka qoysku aanan ku jirin caawimaada dadweynaha.

Wixii ku saabsan macluumaadka khuseeya caawimaada dadweynaha, ka wac Qaybta Adeegaha Bulshada lambarkan 800-865-7801.

Ama gal Boggaan Internetka ah [www.washingtonconnection.org](http://www.washingtonconnection.org) si aad u codsatid, u cusboonaysid, ama usoo sheegtid isbedel dhacay.

## Aabanimo

Waalidiinta aan isqabin waxay samayn karaan aabanimo (aabanimo) marka hooyada ama aabaha ay si iskaada ahi u oggolaadaan in uu yahay aabaha oona sixiixaan Qirista Aabanimada. Waaxda Taakulaynta Ilmaha sidoo kale waxay bixinaysaa baaritaanka asalka hidaha si loo xadido aabanimada xaalado gaar ah. Xaaladaha kale waxaa loo wareejinayaa ficil ama tallaabad maxkamada saraysa ah. Samaynta aabanimada waxaa ka dhallan kara amar dejinaya ama samaynta waajibka taakulaynta ilmaha. Sidoo kale waxay carruurta ku caawinaysaa in ay helaan ceymiska caafimaadka, dheefaha halyeeyga dagaal ee hore, ama dheefaha dammaanada bulshada.



**Waxaa jira seddex qaabab oo si sharci ahaan loogu samayn karo aabanimada:**

- Guurka kahor dhallashada ilmaha.
- Sixiix foomka sharciyeed ee lagu magacaabo Qirashada Aabanimada kadibna u dir Waaxda Caafimaadka. Shahaadada dhallashada ayaa sheegi doonta magaca aabaha haddii dhammaan waalidiinta ay oggolaadaan in ay sixiixaan foomka.
- Hel amarka maxkamada.

Wixii kusaabsan macluumaad dheeraad ah:

- Wac 1-800-442-5437
- Ama ka gal boggeena internetka samaynta aabanimada halkan [www.childsupportonline.wa.gov](http://www.childsupportonline.wa.gov) (ku dhufo dusha Samaynta Aabanimada)

## Amarada maxkamada

Gudaha Washington, Maxkamadaha Sare iyo Qabiilka waxay dejiyaan amarada waxayna go'aansadaan qofka ay tahay in uu bixiyo taakulaynta ilmaha. Amarada maxkamada waxay noqon karaan kuwo loogu talagalay furiin, xanaanad, aabanimo iyo/ama arimo kale oo xiriir la leh taakulaynta ilmaha. Kaliya maxkamada ayaa bedeli karta amarka maxkamada.

Waaxda Taakulaynta Ilmaha ma bedeli karto qoraalka amarada maxkamada. Sharciga gobolka wuxuu uga baahanyahay Waaxda Taakulaynta Ilmaha in ay u raacdo amarada maxkamada sida ay u qoranyihiin. Marka Waaxda Taakulaynta Ilmaha ay dejiso amarka taakulaynta ilmaha, waxaan ku daraynaa bixinta taakulaynta caafimaadka ee looga baahanyahay dhammaan waalidiinta in ay bixiyaan ceymiska caafimaadka, marka laga heli karo tooska qof loo shaqeeyo ama urur.

## **Deymaha isku ururey ee daahay**

- Waaxda Taakulaynta Ilmaha iyo maxkamadaha ayaa dejinaya lacag bixinta taakulaynta ilmaha bilaha ah ayada oo la isticmaalayo Jadwalka Taakulaynta Ilmaha Gobolka Washington iyo sida waafaqsan awooda waalidka uu awoodo in uu lacag bixiyo.
- Lacag bixinada taakulaynta ilmaha aan la bixinin waxay noqonayaan deyn lagu magacaabo deynta isku ururtay ee daahday.
- Lacagta lagu leeyahay waalidiinta xanaanada ee ah taakulaynta ilmaha dambe ama lagu leeyahay Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ee loogu talagalay caawimaada TANF ee la siiyo ilmaha ay yihiin deymo isku ururey oo daahay.

## **Bedelida amarka taakulaynta ilmaha (Bedelida)**

Haddii aad jeceshahay in Waaxda Taakulaynta Ilmaha ay muraajaco ku samayso amarkaaga taakulaynta, wac Waaxda Taakulaynta Ilmaha kadibna ka codso Muraajacada Bedelida. Waalidiintu sidoo kale waxay iskooda bedelaad ugu samayn karaan amarada taakulaynta ilmaha, ama ayaga oo caawimaad ka hela fududeeyaha sharciga qoyska ama qareen khaas ah. Fududeeyayaasha waxay awoodi karaan in adiga kugu caawiyaan pro se (nafsadaada) habka bedelida Midaana macnaheedu waxay tahay in aad maxkamada aadiid adiga oo aan caawimaad ka haysanin qareen. Mararka qaar samaynta adiga nafsadaada waxay noqonaysaa qaabka ugu fudud ee lagu bedelo amarka taakulaynta ilmaha.

Si aad uga heshid fududeeyaha Xafiiska Shaqaalaha Degmadaada wac 800-933-6772.

- Ama gal boggaan internetka ah [www.courts.wa.gov](http://www.courts.wa.gov) ama [www.mrsc.org](http://www.mrsc.org).

## **Lacag bixinada loo diro Waaxda Taakulaynta Ilmaha**

Qaar kamid ah amarada waxay u oggolaanayaan dadka lacagta bixiya in ay si toos ah lacag bixinta ugu diraan waalidka xanaanada. Amarada kale waxay u oggolaanayaan dadka lacagta bixiya in ay u diraan lacag bixinada dhinaca Waaxda Taakulaynta Ilmaha midaas oo ay ku sameeyaan jeeg shakhsi, Bogga internetka ama Wareejinta Lacagaha Iliktarooniga ah (EFT). Wixii ku saabsan macluumaad khuseysa Wareejinta Lacagaha Iliktarooniga ah iyo lacag bixintada Bogga internetka wac 800-468-7422 ama ka fiiri Bogga internetka Waaxda Taakulaynta Ilmaha halkan [www.childsupportonline.wa.gov](http://www.childsupportonline.wa.gov).

Inbaddan oo kamid ah amarada taakulaynta waxay bixiyaan xajin dakhliga ah, midaas oo macnaheedu tahay in qofka loo shaqeeyo looga baahanyahay in uu xajiyo lacag bixinada taakulaynta ee ka ahaada dhinaca dakhliga saafiga ah ee waalidka aan xanaanada haynin midaas oo ah qadarka lacagta laga tagay kadib marka jeritaanada sharci ahaan loogu baahanyahay la sameeyo loona diro lacagta dhinaca Diiwaanka Taakulaynta Gobolka Washington (WSSR). Tusaalooyinka ugu baddan, Waaxda Taakulaynta Ilmaha waxay qaadan kartaa tallaabada xajinta xitaa haddii waalidka aan xanaanada haynin uusan ka dambaynin lacag bixinada.

U diri jeegaga ama amarada lacagta dhinaca:

WSSR  
PO Box 45868  
Olympia, WA 98504-5868

*Si aad u habsatid sax ahaanta hawsha, fadlan iska hubso in si cad loogu qoro magacaaga iyo Lambarka Dammaanada Bulshada dusha lacag bixintaada*

## Lacag bixinada loo diro waalidiinta iyo daryeel bixiyayaasha

Waalidiinta Xanaanada haya waxay qaadan karaan lacag bixinada taakulaynta ilmaha midaas oo ka ahaata lacag dhigashada tooska ah ama kaarka deynta hore loo bixiyay midkaas oo lagu magacaabo Kaarka Waaxda Taakulaynta Ilmaha. Qaababkan waxay u oggolaanayaan Waaxda Taakulaynta Ilmaha in ay lacag bixinada u dhigto ama u geliso dabaaji si iilktaroonig ah. Kaarka Waaxda Taakulaynta Ilmaha wuxuu leeyahay calaamad FIISAD, wuxuuna u oggolaanayaa Waaxda Taakulaynta Ilmaha in ay dabaaji geliso lacag bixinada si makiinada ATM-ka ahi ama meelaha wax laga iibsado (kuwaas oo aqbalaa kaararka FIISADA) waxay bixin karaan taakulaynta ilmaha.

Lacag dhigashada tooska ah iyo foomamka oggolaanshaha Kaarka Waaxda Taakulaynta Ilmaha waxaa laga helayaa gudaha Bogga Internetka Waaxda Taakulaynta Ilmaha ee halkan ah [www.childsupportonline.wa.gov](http://www.childsupportonline.wa.gov) (ku dhufo dusha Qaybta Foomamka Taakulaynta Ilmaha). Wixii ku saabsan macluumaad dheeraad ah wac 1-800-468-7422.

## Sababaha dib u dhigi kara hawsha kiiskaaga

- Waxay ku qaadanaysaa wakhti in Waaxda Taakulaynta Ilmaha ay hesho amarka maxkamada ka ahaada Shaqaalaha Maxkamada Sare iyo dejinta kiiska
- Mararka qaar, Waaxda Taakulaynta Ilmaha ma helayso waalidka aan xanaanada haynin in uu bixiyo warqadaha sharciyeed, soo lifaaqo mushaarka ama hantida kale
- Mararka qaar, waalidka aan xanaanada ahayn wuxuu codsanayaa dhagaysi maxkamad si uu uga horyimaado lacag bixinta taakulaynta ilmaha ama deynta isku ururtay ee daahday
- Haddii waalidka aan-xanaanada haynin uu qaato caawimaada dadweynaha ama uu yahay mid aan shaqaynin, Waaxda Taakulaynta Ilmaha ma awoodi karto in ay aruuriso taakulaynta
- Haddii waalidka aan xanaanada ahayn uusan bixinin cinwaan hadda ah, lacag bixinada waxaa dhici karta in dib loo dhigo ama lasoo daahiyo

## Fullinta

Sharciyada dowlada iyo gobolka waxay siiyaan Waaxda Taakulaynta Ilmaha qalab baddan oo lagu soo aruurinayo taakulaynta ilmaha. Waxaan ugu yeernaa “fullinta” marka aynu isticmaalayno qalabka wax aruurinta. Qaar kamid ah qalabka aynu u isticmaalno aruurinta taakulaynta ilmaha waxaa kamid ah:

- Lifaaqa mushaarka iyo dakhliyo kale sida dheefaha hawlgabka iyo shaqo la'aanta
- Joojinta rukhsada baabuur wadista, kalluumaysiga, u gaarashada iyo kuwo kale
- La wareegida iyo iibinta baaburta, doomaha iyo baabuur kale
- Lifaaq ku saabsan koontooyin maalgashi, keydad iyo jeegag
- Lifaaqa dib usoo celinta IRS, dhaxalka, iyo ku guuleysiga bakhtiyaa nasiib
- Diidis baasaboort

## Gobolo kale

Sharciyada dowlada iyo gobolka waxay u oggolaanayaan gobolada in ay wada shaqeeyaan marka waalidiintu ay ku noolyihiin gobolo kala duwan. Waaxda Taakulaynta Ilmaha waxay ka codsan kartaa gobolada kale in ay ku caawiyaan samaynta, bedelida iyo aruurinta taakulaynta ilmaha gobolada kalena waxay ka codsan karaan Waaxda Taakulaynta Ilmaha in ay arimahaasi ku caawiso.

Maadaama dhammaan sharciyada gobolku aanu isku mid ahayn, way adkaan kartaa in la aruuriyo lacag bixinada caadiga ah marka labbo ama ka baddan oo gobolo ah ay ku shaqeynayaan kiiska taakulaynta ilmaha. Marka ay midaani dhacdo, Waaxda Taakulaynta Ilmaha waxay isku dayaysaa in ay hesho oona soo lifaaqdo mushaarada. Qaar kamid ah gobolada waxay lacag ku qaataan adeegaha, qaar kale oo gobolada kamid ahna waxay lacag faa'iido ah saartaan baaqiga deynta isku aruurtay ee daahday. Gobolka Washington wuxuu saartaa \$25.00 oo lacag sannadle ah haddii aadan weligaaga qaadanin Caawimaada Ku meel gaarka ah ee loogu talagalay Qoysaska Saboolka ah (TANF), TANF-ka Qabiilka, ama Caawimaada loogu talagalay Qoysaska haysta Carruur ayaga ku Tiirsan (AFDC) ee carruurta ku nool guriga. Gobolka Washington wuxuu u aruuriyaa faa'iidada gobolada kale.

## Kiisaska Qabiileed

Qaar kamid ah qabiilada U dhashay Maraykanka waxay haystaan barnaamijyadooda khaaska ah ee taakulaynta ilmaha. Qabiilo kalena waxaa dhici karta in ay haystaan sharciyadooda taakulaynta ilmaha iyo hab socodka hawsha lagu sameynayo oona lagu fullinayo taakulaynta ilmaha marka waalidka uu yahay xubin qabiileed, oo ku nool booska la xajiyay, ama u shaqeeyo qabiil. Waaxda Taakulaynta Ilmaha waxay kala shaqaynaysaa qabiilada in ay sameeyaan oona fulliyaan kiisaska taakulaynta ilmaha.

Wac Waaxda Taakulaynta Ilmaha si aad u heshid macluumaad ku saabsan taakulaynta ilmaha qabiilka ama ka gal Boggeena Internetka halkan [www.childsupportonline.wa.gov](http://www.childsupportonline.wa.gov) (ku dhufo dusha Xiriirada Qabiileed).

## Dhammaan waalidiintu waa in ay u sheegaan Waaxda Taakulaynta Ilmaha marka:

- Ilmaha u wareego gudaha ama meel ka baxsan guriga
- Aad guurtid ama yeelatid cinwaan cusub
- Aad bedeshid magacaaga
- Uu jiro amar maxkamad cusub
- Adiga ama ilmaha uu aado caawimaada dadweynaha, Naafada Dammaanada Bulshada (SSD), ama Dakhliga Dammaanada Dheeriga ah (SSI)

Waaxda Taakulaynta Ilmaha waxay la xiriiraysaa waalidiinta iyo daryeel bixiyayaasha si ay u weydiiso haddii ay haystaan macluumaad ku caawinaya in lasoo aruuriyo taakulaynta ilmaha. Noo sheeg haddii waalidka aan-xanaanada haynin:

- Bedelo shaqooyinka, noqdo shaqo la'aan ama dhaawac gaaro
- Isticmaalo magacyo iyo lambaro Dammaanad Bulsho kale
- Yeesho baabuur, guryo, ama maalgashi ama koontooyin bangi
- Qabbo qoys ama saaxiibo kuwaas oo ay dhici karto in ay garanayaan macluumaadka
- Uu xiranyahay, xabsi ku jiro ama shaqada laga fasaxay



## Rabshada qoyska

Waxaad heli kartaa caawimaad haddii adiga ama carruurtaadu aad khatar ku sugantihiin. Xad gudubka jirka waa mid dembi ah.

- Wac Booliiska
- Ka wac Khadka marwalba shaqeyta ee Rabshada Guriga lambarkan 800-562-6025
- Ka wac Adeegaha Ilaalinta Ilmaha (CPS) 800-562-5624 ama 866-ENDHARM
- Ka wac Barnaamijka Sirta Cinwaanka (ACP) lambarkan 800-822-1065
- U sheeg Sarkaalkaaga Fullinta Taakulaynta ama shaqaalahaaga caawimaada dadweynaha. Sharciga gobolku wuxuu inooga baahanyahay in aynu soo sheegno haddii aynu aaminsanahay in ilmo uu yahay dhibanaha xad gudub ama dayicid.

## Dadka qaba naafooyinka

Waaxda Taakulaynta Ilmaha waxay caawimaad siisaa dadka dhagoolayaasha ah.

- Ka wac khadkeena TDD lambarkan 360-664-5011

Sidoo kale anagu waxaynu qaban qaabinaynaa turjubaano hadalka ah iyo kuwo luuqada dhagoolayaasha ah.

- Naga soo wac lambarkan 800-820-2363



**Anagu waynu ogsoonahay in aad doonaysid in aad daryeeshid carruurtaada.**

*Noo oggoloow in aynu ku caawino.*

<b>MAGAALADA</b>	<b>LAMBARADA TELEEFONKA</b>	<b>IIMAYLKA</b>
<b>Everett:</b>	800-729-7580 425-438-4800	everett-dcs@dshs.wa.gov
<b>Kennewick:</b>	800-345-9981 509-374-2000	ken-icemail@dshs.wa.gov
<b>Olympia:</b>	800-345-9964 360-664-6900	oly-icemail@dshs.wa.gov
<b>Seattle:</b>	800-526-8658 206-341-7000	seattle-dcs@dshs.wa.gov
<b>Spokane:</b>	800-345-9982 509-363-5000	spomail@dshs.wa.gov
<b>Tacoma:</b>	800-345-9976 253-597-3700	tacoma-dcs@dshs.wa.gov
<b>Vancouver:</b>	800-345-9984 360-696-6100	vancouver-dcs@dshs.wa.gov
<b>Wenatchee:</b>	800-535-1113 509-886-6800	wenatchee-dcs@dshs.wa.gov
<b>Yakima:</b>	800-441-0859 509-249-6000	yak-icemail@dshs.wa.gov
<b>Xarumaha saldhiga ah:</b>	800-457-6202 360-664-5000	dcs-cru@dshs.wa.gov





---

*Transforming lives*

---

DSHS 22-583 SM (Rev. 12/15)  
Somali